# Golaha Wakiilada JSL

## Waaxda Shuruucda, Hadal-qoraalka iyo Fadhiyada

### Kal-fadhigii 44aad Fadhigii 28aad

**Isniin 11 January 2021 Furmay:- 10:9 AM**

**Quraanka: -** Md Xaamud Cismaan

**Gudoonka: -** Gudoomiye Md.  Axmed-yaasiin Sh. Cali Ayaanle

**Ajandaha Fadhiga:-** Doodda Xeerka Hay'adda Dekadaha Somaliland

**Gudoomiyaha: -** Mudanayaal waxaynu u balan sanayn doodda Xeerka Hay'adda Dekada Somaliland, mudanayaasha doonaya inay dooda ka qayb qaataan ha is qoraan.

**Md. Xuseen Axmed Caydiid** **(59Min 55Sec):-** Shirgudoonka, Xildhibaanada, Martisharafta iyo Saxaafada Asc wr, Xeerkani waa xeer aad iyo aad u balaadhan, waana xeer inaga iyo umado kalaba xidhiidhinaya, sidaa daraadeed maadaama oo uu xeerkani inagaba uu ina dhaafayo oo uu macaaamilka caalamka inala xidhiidhinayo waa in ahmiyad gaar ah la siiyaa, hadii ay noqon lahayd Turjumaadiisa, qoraalkiisa lana isku eego oo aan runtii aan ku arkay khilaaf badan ingiriisiga iyo qaybta somaaliga, arintaasi waan soo jeedinayaa.

Magaca Xeerka oo u dhigan Aas-aasida Hay'ada Dekadaha, *waxaan soo jeedinayaa in laga dhigo Hay'adaha Dekedaha Somaliland oo laga saaro erayga Aas-aaska sida ay guddiduba soo jeedisay,* Sidoo kale baryahan danbe waxaad arkaysaa in xeerarka inoo yimaada lagu qorayo Tusmo, tusmadaas oo aan lahayn Bog Lanbar, kaas oo ay kuu dhibyaraanayso boga uu ciwaankaasi ku qoran yahay in aad hesho, dhanka Afsoomaaliga laftiisa wax ayaa ka qaldan dhawr jeer oo horana waan sheegee waa in luuqadaa aad ku saxdo, lakiin hadii aad luuqadaada aad ku qalado mid kalana ku sixi maysid.

***Kaah/beacon"*** *waxa loola jeedaa nal, iftiin ama calaamad kasta oo muujinasa gacan-siinta bad-mareenada oo aan ka ahayn nuubiyad (lighthouse) ama buoy.* Halkaa ay ku qorantahay NUUBIYAD maaha Nuubiyada ee waa **NOOBIYAD,** halka kale ee lagu qoray erayga af ingiriisiga ah ee *BUOY marka la af-somaaliyeeyo waa* ***SABEEYE.*** Waxaad moodaa in uu afsoomaaligiiba cidhiidhi inagu yahay, waa in aynu kalmadaha af-soomlliga loo helayo la af-soomaaliyeeyaa.

Dekada Berbera hadii aynu tusaale u soo qaadano waxaa jira wax la yihdaa Approaches oo marka uu markabku Horizon k aka soo boxo, ee uu magaaladu u soo muuqato Approaches ayuu soo gaadhay, kadib waxa uu imanayaa encourage oo ah meesha uu baroosinka dhiganayo markabku, waxaa kale oo jirta  harper oo iyaduna Dugaalkii ah ee dekedu ay gudaha ugu jirtay, waxaa kale

oo jirta ports oo iyaguna darbiyada raac sanaanaya, iyaga oo yeelan karaya terminals, sidoo kale waxay yeelanayaa berths oo ah halka uu markabku uu janbiga saarayo ah ee uu xadhiga ku xidhanayo bears iyo jects ka farcama oo kuwa yar-yari ku xidhan karaan ayay yeelanayaan. Waxaa kale oo ay yeelanayaa keas oo ah barxada wax lagu dajiyo, waxaas oo magac ah waxa aynu leenahay Deked oo kaliya iyada oo waxaas oo magac la istic maalo, sidaa awgeed waxay noqonaysaa in aynu Af-keenii aynu ku qorno ama aynu ingiriisi ku qorno ayay noqonaysaa.

Tusaale ahaan hada waxaynu kala saari laana'ay Harbor iyo port manage, iyada oo ay kala macno balaadhan yihiin oo ay dekedu ku dhextaalo Harbor-ka. Markaa khaladaad badan ayaynu kala kulmaynaa.

**Hage/buoy"** Eraygaas Hage waxaan soo jeedin lahaa in laga saaro oo lagu beddelo Erayga **Sabeeye.**

**Qalab/equipment:** Waxa kamid ah qalab kasta oo loogu talogalay adeeg bixinta Dekeddaha sida qaboojiyeyaasha, kulayliyayaasha, mashiinada iyo dhammaan tuul kasta oo lagama maarmaan u ah adeeg bixinta Dekeddaha. *Waxaan soo jeedinayaa in loo dhigo; waana sida ay Af-ingiriisiga u qo Erayga Qalab; waxaa ka mid ah Aalad, Agab, Mashiin, Hanaan ama Caawiye kasta oo loo isticmaalo ama loola jeedo in loo isticmaalo bixinta adeeg bad-marinimo, Dekadeed ama ta-siilaad eraygaa Ta-siilaad oo meelo badan ku jira xeerka waa in la saxaa.*

**Adeegyada Badda iyo Tashiilaadka**: Waxa loola jeedaa soo xidhida iyo adeegsiinta gaadiidka kusoo xidhanaya Dekedda sida biyaynta taangiyada maraakiibta. *Waxaan soo jeedinayaa in loo qoro;- **Adeegyada Badda iyo Ta-siilaadka;** waxaa loola jeedaa soo kaxaynta iyo soo xidhida gaadiidka bedda iyo sahaysiinta gaadiidka* oo biyo oo kaliya lama siiyee sahay dhan ayaa la siiyaa, kana mid ahaan karaan Biyo, Khudaar, hilib iyo Shidaalba. Sidoo ay barigii hore u ahaan jirtay qayb dhan oo la yidhaa Sahay siinta Maraakiibta.

Sidoo kale waxa uu xeerku Isku Qaldayaa Port Manager iyo Harbor Master oo maareeyaha Dekeda ah oo isgu noqonaya Madax Faraca Bedda, markaa waxaan leeyahay waa in taana la kala saaraa oo madixii faraca beddu sidiisii u taagnaadaa, waayo shaqooyin kala duwan ayay qabtaane yaanu eraygu dekeda oo kaliya inaga noqon ayaan soo jeedinayaa.

Markaa Harbor master-ku waa in uu faricii bada ku muuqdaa, waana in uu maamula wixii dekada ka baxsan hadii ay noqon lahayd wixii shidaal ah ee ku qubanaya bedda, wixii amaanka wax u dhimaya, maraa kiibta furidooda iyo soo xidhidooda, kala hagistooda iyo halka la dhiganayo iyo halka aan la dhiganayn ayuu ilaalinayaa. Halka port manager-ku uu rarista iyo dejinta alaabooyinka uu leeyahay waana shaqooyin kala duwan ee waa in la kala saaraa.

Sida hada dekada Berbera ay u maamusho Dp-wold ee ay Dekeda ugu soo hadhay faraca bedda oo kaliya, sidaa Awgeed waa in Port Manager-ka Ay Dekaduhu u sinaadaan, oo wixii ay cid kale maamusho ku ilaalisaa wixii ay Somaliland maamushaana uu isku mid uga shaqeeyo. Dhanka kale wali maanaan arag heshiiskii Dekada Berbera lagu wareejiyay oo wixii u soo hadhay iyo wixii kale garan mayno.

**Qodobka 4aad; Aasaaska Hay'adda Dekeddaha Farqada 1aad;** Waxa halkan lagu aasaasay Hay'adda Dekeddaha Jamhuuriyadda Somaliland, taasi oo u xilsaaran maamulka arimaha dhammaan dekeddaha. *Halkaa waxaan is leeyahay Maamulka Dekedda Berbera waa la wareejiyay maamulkeediina ma hayso ee in la yidhaa kor ka ilaalinta mooyaame maamulkii wuu ka wareegay taa, qaar kale oo yar-yarina waa laga yaabaa in laga wareejiyo oo shirkado Ganacsi lagu wareejiyo Markaa waa in la yidhaa marka laga reebo, hana la siiyo wixii kor-ka ilaalin ah ee ay leedahay.*

**Qodobka 6aad; Aasaaska iyo Xubinnimada Guddiga Maamulka Farqada 1aad.** Hayadda waxa maamulaya Guddi Maamul (Board of Directors) tiradoodu ka badnayn sagaal (9) xubnood kana yarayn saddex (3) xubnood kuwaas oo uu Madaxweynuhu magacaabo. *Waxaan u arkaa in 9 iyo 3 ay aad u kala baddenyihiin oo hadii uu Madaxweyne 3 ka dhigi mid kalana 9 ka dhigo waxay noqonaysaa wax aad u kala fog ee waxaan soo jeedinayaa in tiro go'an laga dhigo oo 7ah. (Taageero 5 ah ayuu helay).*

Xoga magaca; Mar waxaa la odhanayaa Guddida Maamulka, marna waa Guddida Sare, marna waa Guddida Agaasinka, markaa Saddexdaa magac ee kala jaadka ahbay way qaadatay Guddidii, *sidaa awgeed waxaan soo jeedinayaa in magac kaliya ay yeelato Guddidu kaas oo ah Guddida Agaasinka*

**Qodobka 7aad; Shaqada iyo Waajibaadka Hay'adda farqadiisa "C" Xarafkiisa "I"** badmareenada soo gala xayndaabka maamul ee Dekeddaha. Waxaa haboon in uu xeerku aqoonsado waxyaabihii aan sheegayay, oo Af-soomaaliyo loo hello oo hay'adaasi waxay maamulaysaa agagaarka Dekada, waxay maamulaysaa Baroosin dhigashada, waxay maamulaysaa Dugaalka, markaa waa in laga balaadhiyaa Dekada iyo biyaha oo la gaadhsiiyaa Approaches-ka.

**Qodobka 7aad Xubintiisa 1aad** ***waxaan soo jeedinayaa in loo dhigo sidan; in ay gudato masuuliyada ka saaran Dekadaha Dugaaladooda, Aaga Baroosin dhigashada iyo biyaha ku dhaw*** halkii markii hore laga yidhi dekeda iyo biyaha ku xeeran, hadii laga sii balaadhiyana wey wanaagsantahay.

**Qodobka 7aad Xubinta 1b.** Waxaan soo jeedinayaa in xaga danbe laga raaciyo Dekadaha iyo **Dugaaladooda**
**Qodobka 7aad Xubinta 1c.** Isma laha Turjumaada soomaaliga ah iyo Ta ingiriisiga ah ee laga soo turjumay,
**Qodobka 7aad Xubinta 1f.** Isma laha Turjumaada soomaaliga ah iyo Ta ingiriisiga ah ee laga soo turjumay, *waxaanan soo jeedinayaa in Af-soomaaliga loo dhigo sidan; inay bixiso oo joogtayso noobiyado nalalka tilmaamaha iyo Digniinaha iyo Sabeeyayaal ku filan wax ku oolna ah*

**Qodobka 7aad Xarafkiisa ''R''** In ay heshiis la gasho dadka haysta ruqsad dawladeed oo ku tacaluqa shaqo socodsiinta, maaraynta iyo dayactirka Dekeddaha, si waafaqsan

xeerkan iyo wax ka bedel kasta oo lagu sameeyo qodobada xeerkan kaas oo lagu ogolaanayo qoraal madaxwayne. *Run ahaantii in qodobada xeerka qoraal Madaxweyne wax laga beddelaa waxay noqonaysaa gaf laga galay xeer uu Baarlamaan ansixiyay, waxaa kale oo ay tahay qayro Dastuuri, waxaanay ka hor imanaysaa Qodobka 38aad farqadiisa 1aad ee ahayd in aan awooda sharci dejintu cidkale u wareegi karin. Sidaa awgeed waxaan soo jeedinayaa in laga Saaro;* ***wax ka bedel kasta oo lagu sameeyo qodobada xeerkan kaas oo lagu ogolaanayo qoraal madaxwayne.***

**Qodonka 7aad Faqadiisa 2aad;** Hay'addu waxay bixin kartaa adeegyo baddeed iyo kuwo dekedeed xaaladahan soo socda iyada oon la tixgalinayn in ay cid ruqsad siisay. *Waxaan is leeyahay halkaa malaha qalad ayaa ku jira oo haydii ay Adeeg wareejiso hay'adu oo ay Adeegaa cidi qabanayso heshiisna la kala saxeexday, hadii ay dhaliilo ka yimaadaan in heshiiskii la buriyo mooyaane in ay iyadu tidhaa hawsha waan wadaya Iyana mid meesha ku haboon maaha, markaa halkaa la leeyahay Shaqadii ayay Fulinaysaa Hay'du in la yidhaa Liisankaa laga noqonayaa.*

**Qodobka 9aad oo ciwaan kiisu yahay; - Dekedduhu waxay hoos imanayaan maamulka Hay'adda;** *waxaan soo jeedinayaa in loo beddelo* ***Hoos imaaatinka Dekada ee Hay'ada Maamulka,*** *taas ayaa macnihii magac noqon kartaysa.*

**Farqada 3aad ee qodobkan 9aad** una dhigan; *Madaxwaynuhu, amar ahaan, waxa uu ku dhawaaqi karaa meel kasta oo dalka ka mid ah, sida wabi lagu gooshi karo iyo marin-biyoodada yeelan karo sifo dekedeed, inay yihiin dekedo Qaranku leeyahay, wuxuuna cayimi karaa xudduudaha meelahaas uu ku dhawaaqay in ay dekedo yihiin.* Markaa wabi ayaad sheegaysaaye wax aan Huudhi Marino Ma leenahay, markaa waxaynu meesha ku haynaa Xeer aynaan lahayn, markaa waxaan leeyahay Wabi aynaan lahayn yaynaan xeer u samayn, *ee waxaan soo jeedinayaa in itaa laga tiro labada luuqadoodba.*

**Qodobka 10aad Tilmaamaha Madaxwaynaha** *Iyada oon waxba loo dhimmayn faqrada 1aad ee Qodobkan, Madaxwaynuhu kadib, marka uu latashado Hay'adda ama cidda ay ruqsadda siisay, waxa uu ku tilmaami karaa Hay'adda ama cidda ay ruqsadda siisay qoraal ahaan, in ay fuliso ama aanay fulin hawl gaar ah isaga oo sheegaya qodobada iyo shuruudaha uu Madaxweynuhu u arko munaasib, haddii tilmaantaasi lagama maarmaan u tahay*; Madaxweynuhu Hay'ada qaranka u aasaasan wuu la xidhiidhi karaa tilmaamana wuu siin karaa, shaqooyinkana wuu kala hadli karaa, laakiin hay'adaasi cid ay ruqsad u sii siisay talawgeedu, arintaasi munaasib ilama aha ee waa in uu wixii uu uga baahdo hay'ada ruqsada siisay kala hadlaa. Markaa waxaan ka saarayaa Qodobkaas *erayga ama cida ay ruqsada u siisay.*

**Qodobka 11aad; Bixinta Xogta farqada 2aad** oo u dhigan sidan;- Qof kasta oo ogaysiis lagu wargaliyay si waafaqsan faqrada 1aad ee qodobkan in uu bixiyo wixii qoraal ama xog ah kuna guuldaraysta in uu u hogaansamo shuruudaha ogaysiiska waxa uu galay danbi waxana lagu xukumayaa ganaax 20, 000 oo dallar ah am 5 sano oo xabsi ah ama labadaba.

***Waxaan soo jeedinayaa in loo dhigo sidan:-*** qofkasta oo waxa laga doonayo loogu soo wargaliyo ogaysiis waafaqsan faqada 1aad ee qodobkan ee ku guul daraysta in uu u hogaan samo, waxa laga doonayo waxa uu galay fal-danbiyeen waxaanu mu taysanayaa marka fal-danbiyeedku ku cadaado ganaac $20, 000 ama 5sano oo xadhig ah ama labadaba. Intaas oo waafaqsan qaybta afka ingiriisida ah. (1taageero ayuu helay).

**Qodobka 11aad farqadiisa 3aad Xubinteeda "A"** Qof kasta oo: 'A' Si ula kac ah u bedela, baabiiya ama burburiya qoraal/dokmanti looga baahday oo la ogaysiiyay si waafaqsan faqrada 1aad ee qodobkan in uu bixiyo ama waxaan ***soo jeedinayaa in loo qoro sidan***:- *Qof kasta oo si u kas ah u beddela, qariya ama baabi'iya Documenti laga doonayay ogaysiis waafaqsan farqada 1aad ee qodobkan*

**Qodobka 11aad farqadiisa 3aad Xubinteeda "B"** Bixiya warbixin ama xog loogaga baahday isaga si waafaqsan faqrada 1aad ee qodobkan bixiya warbixin uu ogyahay in ay been tahay waxa uu galay danbi waxana lagu xukumayaa ganaax ilaa 20, 000 oo dollar ah ama 5 sano oo xabsi ah ama labadaba. ***Waxaan soo jeedinayaa in sidan loo dhigo:-*** *Marka uu bixinayo qiyaas xisaab celin ama xog loogaga baahday isaga si waafaqsan faqrada 1aad ee qodobkan eek u sheega weedh uu ogyahay in ay been mugleh waxa uu galay danbi waxana lagu xukumayaa ganaax ilaa 20, 000 oo dollar ah ama 5 sano oo xabsi ah ama labadaba.*

**Qodobka 11aad farqadiisa 4aad** Hay'addu, sida ugu suurtagalsan dhammaadka sanad maaliyadeed kasta, waxa ay Madaxweynaha u gudbinaysaa warbixin sanadeed ku saabsan hawlihii hay'adda u qabsoomay sanad maaliyadeedka dhammaanaya. ***Waxaan soo jeedinayaa in loo dhigo sidan:-*** *sida ugu dhakhsaha badan dhamaadka sanad maaliyadeed kasta u gudbinaysaa madaxweynaha warbixin sanadeed ku saabsan hawl galadii hay'ada ee sanad maaliyadeedka tagay.*

**Qodobka 11aad farqadiisa 6aad** Cid kasta oo adeegsata astaanta, loogooyinka ama calaamad u eg midda Hay'adda si ay ugu siraan ama u sababaan khalkhal keena in ay ku siraan dadka astaanta Hay'adda waxa uu galay danbi waxana lagu xukumayaa ganaax aan ka badnayn 2,000 oo doolar ama xadhig dhan lix bilood ama labadaba. ***Waxaan soo jeedinayaa in loo beddelo Sidan:-*** *qof kasta oo adeegsada Astaan, naqshada ama wakiilnimo la mid ah ama u eeg Astaan, naqshada ama wakiil nimo hay'ada loo yaqaan si uu ugu khiyaameeyo ama uu ugu abuuro khal-khal ama laga yaabo in uu ku khiyaameeyo ama ku abuuro khal-khal waxa uu galay danbi waxana lagu xukumayaa ganaax aan ka badnayn 2,000 oo doolar ama xadhig dhan lix bilood ama labadaba.*

**Hadii aan akhriyo qaybta Af-igiriisida ag ee Qodobka 12aad waxay odhanaysaa Section 12 Appointment of General Manager:- 1.** The President shall appoint a General Manager on such terms and conditions as the President may determine. Halkaa waxaan is leeyahay maadaamo oo shuruudihii lagu soo magacaabayay maareeyaha aynu qofnay in madaxweynuhu uu hadana Such Terms and Conditions la yimaado uuna ku magacaabo Iyana sharcigii ayay baal marsantahay, markaa waa in uu Madaxweynuhu u raacaa shuruudihii u yaalay ee qornaa ee uu xeerku jideeyay. ***Waxaanan soo jeedinayaa***

***in loo beddelo sidan:-*** *The President shall appoint the General Manager on the terms and conditions set out by this law. Oo Af-saamaaligana noqonaysa Madaxweynuhu waxa uu ku magacaabayaa ama uu u raacayaa shuruudaha xeerka.*

**Qodobka 12aad farqadiisa 2aad xubinteeda "A" iyo "B" oo u dhigan sidan:** Qofna noqon maaayo Maareeyaha Guud haddii aanu:

a) Ka qalin jabin Jaamacad la aqoonsan yahay;
b) Lahayn ugu yaraan waayo-aragnimo (5) sano ah oo ugu yaraan hal sano uu ka shaqaynayay arrimaha maamulka, maaraynta Dekeddaha, qaanuunka, dhaqaalaha, xisaabaadka, sayniska ama injiineernimada.

Markaa hadii uu 1 sano ka shaqaynayay waxyaabahaasi 4 sano ee kala halkee ayuu ka shaqaynayay weeyi, waana in la iswediiyaa arintaas markaa halkaa ***waxaan soo jeedinayaa in la yidhaa:-*** *Qofna uma qalmo in loo magacaabo hadii aanu "A'' ka qalin jabin jaamacad la aqoonsanyahay. "**B**'' hadii aanu lahayn ugu yaraan 5sano oo waayo aragnimo ah oo uu u leeyahay ugu yaraan mid ka mid ah cilmiyada maamulka, hawl galinta Dekedaha, sharciga, dhaqaalaha, maaliyada ama ingineernimada.* Waayo qaybta Af-ingiriisuduna sidaa ayay leedahay

**Qodobka 13aad farqadiisa 1aad Awoodaha shaqo ee Maareeyaha Guud 1.** Maareeyaha Guud waxa uu Hay'adda uga masuul yahay habsami u socodsiinta shaqada iyo arimaha maamulka, waxaanu yeelanayaa Maareeyaha guud, shaqooyinka iyo waajibaadyadan: *Waxaan soo jeedinayaa in loo qoro Araarta sidan:- 1. Maareeyaha guud waxa uu Guddida uga Masuul yahay yahay habsami u socodsiinta shaqada iyo arimaha maamulka ee hay'ada waxaanu leeyahy awoodaha iyo xilalka iyo waajibaadyadan soo socda.*

**Qodobka 13aad farqadiisa 1aad Xarafkeeda "B"** una dhisan sidan:- In uu socodsiiyo hawlaha maalinlaha ah ee Hay'adda iyo xaqiijiyo hufnaanta shaqo ee Dekeddaha hoos yimaad maamulka; *waxaan soo jeedinayaa in loo dhigo sidan :- In uu socodsiiyo hawl-maalmeedka Hay'adda iyo xaqiijiyo shaqo wanaaga Dekeddaha hoos yimaad hay'ada ee ay lahaan sheheeda leedahay.* Waa kuwii aan lagu wareejin cid ee ay dawladu gacanta ku haysay

**Qodobka 13aad farqadiisa 1aad Xarafkeeda "C"** qaybteeda Danbe ee u dhigan sidan:- *iyo in uu qabto dhammaan shaqooyinka Hay'addu u baahan tahay*; ***waxaan soo jeedinayaa in loo dhigi sidan:-*** *iyo in uu qabto guud ahaan shaqooyinka iyo arimaha looga baahdo wanaajinta hawl-galada hay'ada*

**Qodobka 14aad farqadiisa 3aad, Waajibaadka Maareeyaha Guud 3.** *Haddii aan la dabaqin faqrada 2aad ee Qodobka 14aad, waxa uu galay danbi wuxuuna mutaysanayaa ganaax lacageed oo dhan 5000 oo doolar. Halka qaybteed Af-ka ingiriisida ku qarana uu yahay:- If Section 14(2) does not apply, a person who contravenes Section 14(1) is guilty of an offence and shall be liable on conviction to a fine of $5,000.* Halkaa farqadaa 2aad ayaa sheegtay qofkii u hogaansami waaya farqadaa labaad wixii lagu ciqaabaayo, halka farqadan 3aad ay leedahay hadii ay munaasib ku noqon weydo farqadaa 2aad waxaas ayaa la yeelayaa, markaa saw in waxay munaasib ugu noqon weyday in la sheego maaha oo la yidhaa intaa ayaa lagu ciqaabayaa

iyada oo aan danbigii la cadayn, halkaa waxaan is leeyahay qalad ayaa ku jira. ***Waxaan soo jeedinayaa in farqadaa meesha laha saaro waayo tii hore ayay macno tirayaa.***

**Qodobka 17aad:- Waajibka in aan Xilka si Khaldan looga Faaiidaysan** *waxaan soo jeedinayaa in la dhigo Khalad uga Faa'idaysiga xilka* oo loo qoro sidi ciwaan ahaan

**Qodobka 17aad farqadiisa 1aad** *Sarkaal kasta oo xil ka haya Hay'adda ama mid hore uga hayay, hadii uu dalka joogo iyo haduu dibada ku maqanyahaba, waxa ka reeban inuu si xun u isticmaalo awoodiisa si toos ah iyo si dadban toona, si uu dheef u helo isagu ama cid kale dheef u hesho ama uu ku waxyeeleeyo Hay'adda.* Halkaa garanay Sarkaal xil haya oo wuu ka faa'idaysan karaa, laakiin ka sii hayn jiray xil uu ka faa'idaysto maanta ma hayo *markaa waxaan soo jeedinayaa in laga saaro ka xil hore u hayn jiray ee kaliya aynu ka hadalo ka hada. Ama in loo qoro sarkaal kasta oo xil ka haya hay'ada hadii uu dalka joogo iyo ohadii uu maqanyahayba waa in aanu si xun u adeegsan awoodiisa, si uu si toos ah ama dadbanba faa'iido ugu hello naftiisa ama cid kasta oo kale ama uu ku sababo waxyeelo hay'ada soo gaadha.*

**Qodobka 19aad Farqada 2aad,** *Dhammaan mushaarooyinka, Gunnooyinka iyo kharashaadka kale ee la siinayo hawlwadenada, saraakiisha iyo Maareeyaha hay'adda waxa lagu salaynayaa siyaasadda mushaarka iyo Gunooyinka shaqaalaha dawladda Somaliland.* Halkaa Guddigu waxay sheegeen in heer caalami loo eego maadaama oo khataro badi meesha yaalaan in ay shaqaalaha kale ee caadiga ah dhaami karaan, *halkaa waxaan soo jeedinayaa in loo raaco Gobolk geeska Africa ha loo raaco ayaan odhan lahaa, waayo caalamiga waxaa laga yaabaa in aynu awoodi weynee. Oo wixii dheef ah ee ay qaataan aynu ka dhigno, mida kale ayaynaan shaqaalaha dawladana ku dabrin ama aynaan ku xidhin.*

**Qodobka 22aad Farqada 3aad waxay tix raacaysaa Faqrada 3aad** waxaanan filayaa in ay tahay qalad madbiciya ee waxaan soo jeedinayaa in la Saxo. Waxaanan filayaa in loo jeedo farqada 2aad ee qodobkan.

**Qodobka 23aad** oo u dhignaa sidan **Dakhliga Hay'adda** waxay Guddida Dhaqaaluhu u dhigtay **Qoondaha Miisaaniyada Qaranka ugu jirat,** waxaan qabaa in hay'adaha madaxa banaani ay miisaaniyada iyagu kabaan, lakiin iyaga miisaaniyada wax looga qoondeeyo waxaan isleeyahay meesha kuma jirto, waayo iyaga ayaa hayga oo loo dhiibay ilihii dhaqaalaha ee dalka ee waa in ay kabaan dawlada dhexe. Kaliya hadii dawladu deked samaynayso am acid kale inaga caawinayso wixii mashruuc ah, dekedaha waa la galin karaa, ee ayayna qoondayn ku yeelan miisaaniyada, *markaa waxaan soo jeedinayaa in farqadaa laga saaro.*

**Qodobka 25aad.** Ee ciwaan kiisu u dhigan yahay Sidan:- **Miisaaniyadda Sanadlaha ah *waxaan soo jeedinayaa in loo dhigo sidan:-*** *Miisaaniyad Sanadeedka Hay'ada.* Sidoo kale Qodobka **25aad farqadiisa 1aad** ee u dhigan sidan;- *Hay'addu waxay yeelanaysaa Sannad miisaaniyadeed uu ansixiyo Baarlamanku oo ka mida miisaaniyada qaranka, kaasi oo laga bixin doono dhammaan lacagaha lagu daboolayo kharashaadka ay u gasho si ay u fuliso hawlaheeda iyo waajibaadyadeeda shaqo ee uu Xeerkani dhigayo.* Sanad maaliyadeedka kharashaad lagama

saaree, miisaaniyad sanadeedka ayaa laga saaraaye markaa waxaan soo jeedinayaa halkaa la yidhi miisaaniyad sanadeed waa *Sanad miisaaniyadeed.* Islaa qodobkaa halka ay ku qorantahay BAARLAMAANKA waxaan soo jeedinayaa in lagu Beddelo Golaha wakiilada.

**Qodobka 31aad Faqadiisa 1aad oo u dhigan sidan:-** Iyada oo la raacayo Qodobada Xeerkan, Hay'addu waxay ka qaadi kartaa qiimeyaal, khidmado iyo ujuurooyin adeegyada ay bixiso marka uu Madaxweynuhu u ansixiyo iyada oo Faafinta rasmiga ah ku soo saaraysa. ***Waxaan soo jeedinayaa in loo dhigo sidan;-*** *Iyada oo la raacayo Qodobada Xeerkan, Hay'addu waxay xeerka marka Xili ka soo wareegaba ay soo rogi kartaa tacrifado Khidmado iyo ajuurooyin ka duwan kuwii hore adeegyada ay ka qaado kuwii hore, ka dibna Golaha Wakiiladuna uu ansixiyo faafintana ku soo baxdo.*

**Qodobka 31aad Faqadiisa 2aad oo u dhigan sidan:-** Hay'addu waxay diyaarinaysaa, faafinta rasmiga ahna ku soo saaraysaa sida ay u aragto in ay ku haboon tahay Buuga Tacriifadda oo ka kooban dhammaan tacriifadaha, khidmadaha iyo lacagaha loo qaadayo si waafaqsan Xeerkan.. *Arintaasi waxay u ekaanaysaa in hay'adu buug ay leedahay tacriifadaha ku diyaariso* ***waxaan soo jeedinayaa oo qaybta ingiriisiga ahna ay u dhigan tahay in farqadaa loo qoro sidan:-*** *hay'adu waxay ku talaabsanaysaa in sida ugu haboon ee ay la noqoto loo diyaariyo looguna soo saaro faafinta rasmiga ah, Buuga tacriifadaha oo koobaya dhamaan, ajuurooyinka, khibmadaha uu xeerku jideeyay iyo arimaha kale ee hay'adu faafintoodu lagama maarmaan u aragto.*

**Qodobka 31aad Faqadiisa 4aad oo u dhigan sidan:-** Hay'addu waxay go'aamin kartaa lacagaha laga qaaday soo saarista iyo cusboonaysiinta ruqsaddaha ama ogolaanshaha shaqo ee loo soo saaray si xeerkan ama xeer-nidaamiyaha waafaqsan. ***Waxaan soo jeedinayaa in loo qoro sidan:-*** *Hay'addu waxay Soo Jeedin kartaa Xadiga lacagaha laga qaadayo bixinta Ruqsadaha cusboonaysiintooda iyo lacagaha laga qaadayo ogolaashaha adeeg bixinaha loo meel marinayo si xeerkan waafaqsan waxaana ansixinaya Golaha Wakiilada.*

**Qodobka 31aad Faqadiisa 5aad oo u dhigan sidan:-** Hay'addu, haddii ay u aragto lagama munaasib, waxa ay dhaafi kartaa gabi ahaan ama qayb ahaan tacriifadaha, khidmadaha iyo lacagaha ay u qaado si xeerkan waafaqsan marka uu Madaxweynuhu ogolaado. *Waxaa jira qod dastuuri ah oo ka hadlaya dhaafida takaaliifta iyo wax walba sheegay oo leh ilaa xeer ansixiyo in aanay cid kale dhaafi karrin* ***waxaan soo jeedinayaa in laga saaro farqadaa 5aad.***

**Qodobka 31aad Faqadiisa 6aad oo u dhigan sidan:-** Mulkiilaha, wakiilka ama maamulaha doonta/markabka soo galaya, ka baxaya ama adeegsanaya Dekeddu waxa uu bixinayaa oo Hay'adda siinayaa khidmadaha adeega ee Hay'addu dajiso ee Madaxweynuhuna ogolaado faafintana lagu soo saaro. ***Waxaan soo jeedinayaa in loo dhigo Sidan:-*** *Mulkiilaha, wakiilka ama maamulka/weel badeedka soo galaya, ka baxaya ama adeegsanaya Dekeddu waxa uu bixinayaa oo Hay'adda siinayaa khidmadaha adeega ee xeerku jideeyay.*

**Qodobka 33aad Faqadiisa 17aad oo u dhigan sidan:-** Haddii Hay'addu maamulaha Dekedda ku wargaliso in lacagta ku waajibtay tacriifadaha, khidmadaha, lacagaha, cawil celinaha, ganaaxyada ama lacagaha kale ee loo bixiyo si waafaqsan xeerkan ama xeer-nidaamiyeyasha lagu leeyahay markabka, mulkiilaha, wakiilka ama kabtanka markabka, Maamulaha Dekeddu siin mayo markabka warqadda fasaxaaadda (port clearance) ilaa uu lacagahaa si buuxda u bixiyo ama damaanad ay Hay'addu ku qanacdo o in uu bixinayo bixiyo. ***Waxaan soo jeedinayaa in halkaa lag tiro Xeer-nidaamiyaha erayga kabtankana waa markii ugu horaysay ee la isticmaalo markaa waxaan leeyahay waa in eraygii aan ku soo marnay Eraybixinta aan ku noqono. Hana loo beddelo sidan:-*** *Haddii Hay'addu maamulaha Dekedda ku wargaliso in aan la bixin lacagta kaga waajibtay tacriifadaha, khidmadaha, lacagaha, cawil celinaha, ganaaxyada ama lacagaha kale ee loo bixiyo si waafaqsan xeerkan, laguna leeyahay mulkiilaha markabka ama maamulaha markabka, maamulaha Dekadu siin maayo markabka warqada basaxaada.*

Qodobada ka hadlaya Danbiyada, Ciqaabaha ee Guddida Goluhu ay ku soo talisay in ahay'adu ku soo saaro xeer-nidaamiyayaal meel kasta oo uu xeerka kaga jiro, taas waxaa leeyahay wax xeerka lagu cadeeyo mooyaane wax ay ganaaxyo iyo lacago lagu qaado oo ay hay'adu sii samaysataa yaanay jirin ayaan soo jeedinayaa.

Sidoo kale waxaa jira Meelo xeerku kaga hadlayo in wax laga beddelo Tacriifaha oo a hay'da loo awood siiyay. Taana waxaan soo jeedinayaa in laga daayo, waayo waxay waxay ka soo hor jeedaa Qodobkaa 14aad ee Dastuurka JSl.

**Point Of Order** ayaa uu codsaday Mudane ka tirsan Guddida dhaaluhu Md. Maxamed Xuseen X. Ciise, "mudane Gudoomiye halkaa waan yara saxayaa Dekeda iyo kastamku waa kala gaar, Dekedu Cashuur ma qaado ee waxay qaadaa adeeg waxayna ka qaadaa badeecadaha iyo maraakiibta, markaa iyadu kuma jirti tan aynu ka hadlayno ee Dastuurku jidaynayo, ee marka badeecada la dejinayo gaar ayay u qaadaan oo iyaga ayaa dejiya, halka maraakiibta ay ka qaadaan port charge ee maaha ta uu dastuurku mamnuucay, xeerkuna taas ayuu ka hadlayaa waad mahadsantihiin.

**Md. Xuseen**; Mudane Gudoomiye port charge iyo handling Fees-ka iyo wixii kale ee takaaliif ah ee markabkaa laga qaadaa intuba waxay saaran yihiin allaabta, marka uu dastuurku leeyahay waxaa loo eegayaa danta dadka iyo bulshada, hadii aan taa la eegina danta bushada lama eegin. Markaa waa laga maarmaan in danta uma la eego ayaan leeyahay oo wixii takaaliif umada fuulaya Uu Golaha Wakiiladu ansixiyo.

Ugu danbayntii waxaan kaga baxayaa Qodobka Guddida Agaasinka oo xeerka iyo Guddiduba ay yidhaahdeen Madaxweynaha ayaa digreeto ku soo saaraya kuna cayimaya mudo Xilood kooda, waxaan is leeyahay hadii Madaxweyne 3sano ka dhigo mid kalana 5sano ka dhigo waa khal-khale waxaan leeyay mudo xileedkaa Xeerku ha jaan gooyo oo ha ka dhigo 5sano oo qof istaahila dib loo soo doorto WSC.

**Md Siciid Maxamed Cilmi (13min 45sec)** Guddoomiyaha, Xildhibaanada, xoghaynta iyo Saxaafada waan salaamayaa, marka ugu horaysa waa in aynu isla fahanaa xeerkan dabeecadiisa. Dabeecada xeerka haddii aynaan fahmin waxa imanaysa in meelo farabadan oo u baahan dabeecada uu leeyahay in loo eego in aynu gacanta gashano wax ka saarno ama wax dheeraad ah ku darno.

Dabeecadiisu waxa weeye aniga sida ii muuqata xeer lagu dhaqmayo maraakiib iyo weel inooga imanaya dalal kale, waa xeer dabeecad caalamiya leh (International Character), taas waxaa uga jeedaa maadaama xeerku dabeecad caalamiya leeyahay, xaaladaha caalamkuna siyaabo deg-deg ah isu wada bedelaan. In aynu ka dhuigni xeer xidh-xidhan, waxay keenaysaa in dekedeheenu la tartami waayaan Dekedaha Gobolka ku yaal.

Markaa kow aynu maskaxda ku haysano xeerkani waxa uu leeyahay dabeecada caalami ah, sidaasi darteed waa in xeerka uu furfurnaasho ka muuqdaa. Waxaan qaybta page numberka iyo eray bixinta ku raacsanahay Xildhibaan, Gaashaanle sare Xuseen Axmed Caydiid oo Ciidanka badda ahaan jiray oo khibrad gaar ah u leh arrintan.

Anigu waxaan galay oo aan aqoon y leeyahay qaybta ka hadlaysa Accounting and Finance. Shan qodob ayaa midba si u taabtay; **Qodobka 25aad, Qodobka 27aad, Qodobka 28aad, Qodobka 30aad iyo Qodobka 31aad.**

**Qodobka 25aad: Miisaaniyada Sanadlaha ah**
Farqadiisa 1aad "Hay'adu waxay yeelanaysaa Miisaniyad sanadeed uu ansixiyo "**Baarlamaanku"** halkaas dood badan ayaa ka taagan aynu ku bedelno "**Golaha Wakiilada"**

**Qodobka 27aad** laba farqadood ayuu qoray, hadhaw si aan la isku qab-qabsan si loo balaadhiyo afar farqadood ayaan ka dhigay;

Laba farqadood oo cusub ayaan ku soo daray, sababta aan ugu soo daray waxa weeye ahlkan wax aka maqan xisaabaadka iyo diiwaanada xisaabiyaha guudbaa ku shaqo leh, meel qudha lagagam soo hadal qaadin xisaabiyaha guud, xisaabaadka iyo diwaanada xisaabiyaha guudbaa shaqo ku leh. Hanti dhawrku waa baadhis,laakiin cida loo xisaab celiyaa waa xisaabiyaha Guud.

**Farqada 2aad** ee odhanaysa "**Hay'addu waxay siinaysaa Hay'adda ay khusayso"** waxa laga dhigay waxaan la garanayn waxaan ka dhigay **"Hay'addu waxay siinaysaa xafiiska xisaabiyaha Guud Xisaab celinta xisaabaadka iyo xogaha kale".** Halkaas iyada waan saxay uun.

**Farqadan** 2aad lafteeda muu sheegin Xisabaadka goormaa la siinayaa, waxaan ku sheegay halkan waxaan idhi **" Ugu dambeyn 31 bisha saddexaad march"** waa inuu xisaabaadku wakhti la gudbinayo yeeshaa oo aanay iska furnaanin.
Waxaan idhi **"Xisaabiyaha guud waa inuu u gudbiyaa Hanti dhawraha Guud, marka uu gudbinayo xisaabaha guud ee Qaranka**", oo tacriif leh oo PFM Act ku qoran.

Farqada 4aad: Imika waxa laga hadlayaa Xisaabaadkii guud ee sanadka, inayu ku darno in Hanti dhawruhu iyada oo la gaadhin xiligii Xisaab xidhka inuu waydiisan karo, **(1 Seconded)**

**Farqada 4aad** "Hay'addu waa inay u gudbiso xafiiska xisaab celinta xisaabaadka iyo xogaha kale ee khuseeya Hay'adda, markasta oo hanti dahwraha guud sidaas soo codsado"

**Qodobka 28aad** Halka faqrada 1aad "**Hanti dhawraha Guud"** waxaan ka dhigay "**Xisaabiyaha Guud".**

**Farqada 2aad "Hanti dhawraha Guud ayaa baadhaya xisaabaadka loo soo gudbiyo"**

**Farqada 3aad:** Waxa qoran **"Hay'addu waxay u baahinaysaa dadweynaha waxaanay suurto gelinaysaa inay helaan warbixinaha la baadhay ee lagu sheegay farqada 1aad, maalinta uu Hanti Dhawraha Guud xisaabta dhamaystiro oo ah 31 bisha June".**

Waa in aynaan wakhti u dheerayn Hanti dhawraha Guud wakhtiga uu keenayo warbixinaha xisaabaha la baadhay una baahiyo dadweynaha (2 seconded).

**Qodobka 31aad Farqada 5aad** ee Qodobkan "Hay'addu haddii ay u aragto lagama maarmaan waxay dhaafi kartaa gabi ahaanba ama qayb ahaan Madaweynuhu markuu ogolaado" halka ah madaxweynuhu marka uu ogolaado marka tacrifadaha la samaynayo ama la dhaafayo. **Anigu waxaan soo jeedinayaa in sideedaa loo daayo**.

Sababta oo ah tacrifahdu waxay ku qoran yihiin dastuurka, laakiin inaga ayaa awood u leh arrintaa tacrifadaha maadaama oo ay tahay wax deg-deg isu bedelaya taabanaysana hay'ado caalami ah, arrin ganacsina ay tahay maraakiib badda taagan oo markaa la dejinayo ayaa tacrifadu daqiiqad is bedeli kartaa caalami ahaan, markaa waa inay dekeda la jaanqaado. Haddii la yidhaahdo Golaha Mar kasta ha lagu soo celiyo oo xeer ha laga dhigo, sanadka gudihiisa ayey is bedelaysaa oo tacrifadaha qaar ayaa shan goor is bedelaya. **Markaa anigu waxaan qabaa oo aan soo jeedinayaa maadaama aanay kastamisna ahayn oo ay adeegyo tahay, dadka lala macaaminayaana ay tahay dad aynu tasiilaad u samayno internationally waxay keenaysaa caqabado farabadan. Weelalkaas**

**meesha taagan, xaaladahan is bedelay in la yidhaa Golihii dib ha looga soo ansixiyo, waxaan odhan lahaa aynu inagu u fududayno oo halkeeda ha lagu daayo (1 seconded).**

Waxaan soo jedinayaa Guddoomiye in la ansixiyo xeerkan dekedaha ee horteena yaala, iyadoo la raacayo talada Guddida Dhaqaalaha iyo Ganacsiga talada wanaagsan ee ka soo jeediyeen. Xildhibaan Xiseen Axmed Caydiid waxaan ku raacay xaga hore sixida Af-soomaaliga iyo halka ugu horaysa ee ah erey bixinta iyo shantaa Qodob ee aan soo jeediyey wa bilaahi tawfiiq, waanan idiin mahadnaqayaa dhammaantiin.

**Md. Siciid Ismaaciil Warsame** **(13min 55sec):-** Waxaan marka hore salaam u soo gudbinayaa Shir-guddoonka Xildhibaanada, xoghaynta iyo Saxaafada. Anigu waxaan eegay xeerkan guud ahaan qodobo ka maqan oo aan rabo in aan soo jeediyo.

Marka laga hadlayo dekedo anigu waxaan aaminsanahay inay marka hore kala yeeshaan qaybahooda kala duwan (Category), kumana jiraa heerarka (standards) iyo shaqadoodu. Waxaan odhan lahaa xeerka ha lagu soo daro qaybahooda iyo heerarkooda (category and Standards).
Marka meel cusub deked loo aqoonsanayan inay way ka maqan tahay, waxaan odhan lahaa ha lagu soo daro habraaca marka meel deked loo aqoonsanayo, oo shuruudihi dekedaasi ku iman lahayd ayaa muhiim in lagu soo daro. Haddii aynu meel walba oo dhagax walba reer ka dhigto deked dee waa wareer kale, waxaanaay ku socotaa sidii toolooyinkii iyo degmooyinkii cusubaa oo kale.

Waxaan odhan lahaa waa in la helaa marka deked la samaynayo habraacii iyo qaabkay ku imanaysay. Dhul aan waddaba lahayn ayaa ku jira, haddii dekedo meel ay wax gaysaaba ku jirin, oo intay isu jiraan, cabirkeeda iyo darajada lagu qiimayn karo. Dekeda waxa ku xidhan kara hoos, barxad waxay qaadi karto iyo muhiimada ay halkaas u leedahay iyo inay leedahay meel ay wax gayso.

Markaa waxaan isleeyahay ansixinta iyo habraaca deked cusubi ku iman karto way ka maqan tahay meesha. Xeerku ma reebin in la samaysan karo dekedo gaar ah iyo in dekedaha dawladu kaligeed yeelan karto. Waa inay jirtaa qaab iyo hiigsi aynu ka leenahay qaybka aynu dekedaha u samaysan karo, maadaama oo aynu leenahay xeeb gaadhaysa ilaa 800KM.

Waxa jirtay dekado reer reer la isugu haystay, taas waa in xeerku xal u helaa, kumana jirto xeerka oo waa in deked dawladu yeelan karto ama inay cid la yeelan karta (Public Private Partnership) waa inuu xeerku ka hadlaa. Waxa kale oo jirta shuruudihii samaysanka haddii ay gaar noqon karto waa inay Iyana ku jirtaa.

**Qodobka 7aad Ansixinta Maareeyaha Guud ee Guddida** Guddida Dekeda Madaxweynaha ayaa Magacaabaya, laakiin waxaan ku raacay fikirkii Xuseen inay wax go'an noqoto 7 xubnood, markaa Madaxweynuhu Magacaabo waxay noqdeen Hay'add dastuuriyee waa inu Goluhu ansixiyaa. (1 seconded).

Waxyaabaha ka reeban icticmaalka Dekedaha kuma jirto oo si wacan uguma cadda, waxaan odhan lahaa waa in lagu daraa waxyaabaha lidiga ku noqon kara nabadgelyada iyo Qaranimada koow in Qodobka laga dhigo iyo qashinka iyo hadhaaga warshadsaha aan waddan la soo gelin ee waxyeeli kara bee'ada.

Ka faa'iidaysiga bogcad dhuleedka waxaan odhan lahaa ha lagu darro bogcad baddeedka oo ileen dekedu dhul iyo badba way ka kooban tahee. Waxaan soo jeedinayaa xaga dhulkii ayaa yaala xagana baddii markaa ha la saxo.

Waxa kale oo aan ku jirin oo laga tagay Ilaalinta Deegaanka iyo fayo qabka Bee'ada waanu inuu ku jiraa xeerka Dekeda, horena waxaynu u soo saarnay xeerka Maaraynta Deegaanka Qaranka, kaasi waxa uu eegayey in waxa kasta loo eego fayo qabka deegaanka. Waxa jira dekedaheena marka maraakiibtu timaado waxa qasab ah in lagu darro lacag deegaanka ah, waana laga maarmaan waayo mid aan qashin keenayni ma jirto, isla markaana ilaalintoodii gaarka ahay sida xeerarku sheegayaan oo xeerarka ku xusnay waa in maraakiibta la ilaaliyaa oo qodobka ayaa sheegayey fayo qabka maraakiibta.

Xeerku haddii aanu xeerkii hore la adeegayn waxay noqonayaa inay iska horimaadaan. Waxaan odhan lahaa xeer kasta oo aynu samaynayno ha loo eego xeearkii hore, kaasi waa mid muhiim ah. Markaa xeerarka waxaan odhan lahaa wax ka maqan Ilaalinta Deegaanka iyo fayo qabka Bee'ada ee ha lagu darro.

Maamulka dakhliga Dekedu kuma jirto waana mihiim in la yidhaa deegaanka laga dhisay dekedu muxuu yeelanayaa, Maamulka dekedu muxuu yeelanayaa miisaaniyadda maxay ku kabaysaa yeelanayaa kuma jiro waana in ay ku jirtaa oo xeerku sheegayaa.

Waxa kale oo xeerka ka maqan ciqaabaha ka dhalan kara ka soo dejinta waxyaabaha mabnuuca ah, waxaan odhan lahaa iyada oo la tixgelinayo dambiga laga galay inta uu leeg yahay, iyada oo lagu xukumaayo ganaaxyo

**Point of order Xildhibaan Maxamuud Axmed Obsiiyey:** Waxa laga tagay way yar tahay, laakiin waxaan xildhibaanka xasuusinayaa xeerarka dhaqangalka ah ee marwalba ay tahay in shuruudaha la raaco waa khasab. Waajib ayaanay tahay wixii xeer ah ee dhaqangal ah ama ha noqoto fayo dhawrka deegaanka, ama ha noqoto qashin qybka iyo waxaas. Xeerkii ugu dambeeyey ayey ku jirtay mukhadaraadka oo kale wixii qaanuun ahaan qabanayey markaa waa in la xisaabtamo oo aan la dhan way ka maqan tahay.

Waxaan soo jeedinayaa in lagu soo rogo ganaaxyo iyo ciqaabo kolba inta uu leegyahay, iyada oo lalal akhrinayo xeerarka jiray waxa ay sheegayeen sida, Xeerkii maaraynta Qashinka, Xeerkii Maaraynta Fayo Dhawrka Deegaanka Xeerarka nabadgelyada iyo wixii la mid ah.

Waxa Iyana marag ma doonto ah in saddex jeer qarax ka dhacay dekedeena, oo la yidhi walxaha qarxa oo meel lagu kaydiyey ayey ka dhasheen. Markaa dekeda iyo wax aka dhashay ma ogayn sidii Lebnan aynu khatar galnay, waxaan oo dhani wax tirsin oo diiwaangelisay may ahayn, waxay in wax la iska waydiiyo oo dawladu soo bandhigto.

Sida Xildhibaan Xuiseen sheegay ma hayno Heshiiskii lala galay DP world xeerka ayuu ka mid noqon lahaa heshiiskaasi mana hayno. Waxa kale oo ka maqan xeerka in lagu darro haddii la keeno walxaha qarxa cidii loo raaci lahaa qasaarahaas iyo hantidaa burburtay ee dekeda taalay.

Takaaliifta waxaan ku raacay xildhibaan Xuseen Axmed Caydiid. Qodobka 34aad sida dastuurku sheegayo in wax kasta oo la ururinayo lacag kasta la ururinayo uu sheegayaa oo uu odhanayaa lama ururin karo ilaa uu ogolaado Golaha Wakiiladu,maadaam handling Iyo waxana la qaadaya shacabka fuulayaana oo ay culays ku noqonayaan. Waxay la mid tahay tan cashuurta ah.

Waxaan Xildhibaan Xuseen ku raacsanahay in lacag kasta oo takaaliif ah oo la qaadayo loo eego qoodbka 34aad ee Dastuurka, qodobkani wuu ka weyn yahay kastan, waxaanay xitaa lacag kasta oo la ururinayo in sanduuq loo sameeyo, waxaanan Xildhibaan Xuseen Axmed Caydiid ku raacsanahay in cashuur kasta oo la qaadayo ama takaaliif kasta uu an sixiyo Golaha Wakiiladu.

## Kal-fadhigii 44aad Fadhigii 29aad

**Salaasa 12 January 2021 Furmay:- 10:04 AM**

**Quraanka: -** Md. Obsiiye

**Gudoonka: -** Gudoomiye Md. Axmed-yaasiin Sh. Cali Ayaanle

**Ajandaha Fadhiga:-** Doodda Xeerka Hay'adda Dekadaha Maalintii 2aad

**Gudoomiyaha: -** Mudanayaal waaxa inoo socotay doodda Xeerka Hay'adda Dekada Somaliland, waxaan doodda ku soo dhowaynayaa Md. C/raxman Maxamed Jaamac

**Md. C/raxman Maxamed Jaamac (Aw-xoog)** **(11min, 54sec)**:- Shir-gudoonka oo inuu Gudoominayo Md. Axmedyaasiin Sh. Ayaanle, Mudanayaasha Golaha, Saxaafada iyo marti-sharafta kale.

Mudane Gudoomiye, Mudanayaal, Warqad ka soo baxday Xafiiska madaxweynaha oo ku taariikhaysnayd 24/08/2020 sumadeeduna ahayd JSL/XM/GW/081-547/082020 waxay u dhignayd mudane Gudoomiye waxaan halkan idiinku soo gudbiinayaa saddex xeer oo kala ah Xeerka Hay'adda Dekaddaha, Xeerka Aagga Cashuuraha ka caaga iyo Xeerka Diiwaangalinta Shirkadaha Aagga Cashuuraha ka caagan, Xeerarka Warqadaas Madaxweynaha ka soo baxday waxay ahayd in Goleheenu u guda galo oo uu soo kala horeysiiyo Goleheenu siduu uu u soo kala horeysiiyay Madaxweynuhu, laakiin waxaynu soo horaysiinay xeerka Aagga Cashuuraha ka caagan oo Gudiddii maamuli lahayd la doonayo in lagu ansixiyo Xeerka maanta ina horyaal oo ah Xeerka Dekadaha Somaliland, waa carabadii ama gaadhigii oo laga soo horeysiiyay faraskii jiidi lahaa (the cart before the horse), marka dhaliishaa inaga leh mar hadii aynu u soo horeysiinay xeerkaas.

Muhiimada saddexda xeer ayuu Madaxweynuhu inoogu sheegay in ay muhiimad wayn u leeyihiin dhaqaalaha, shaqo abuurka, maalgalinta, ganacsiga iyo wax soo saarka. Su'aasha aan is waydiinayaa waxay tahay shaqo abuurka ma waxa loo sameynayaa bulshada inta guulaysatay ee Madaxweynuhu odayga u yahay, waa sidii uu hadalka u dhigay maalintii maalmaha ka tilmaamnayd ee Agabar.

Hadii jawaabtu tahay in shaqo abuurka loo samaynayo bulshada Somaliland dhamaanteed waxaan codsanayaa in gudi laga magacaabo Golaha soo tiro kooba shaqaalaha ka hawlgala dekada si hubiyo in dekadu tahay mid muujinaysa inay tahay dekada Somaliland la wada leeyahay, waxaan ogahay in shaqada dekada Berbera loo kala dhaxlo sida daaraha oo lagu qaybiyo hantida uu marxuumka shaqaalaha geeriyooday ka tagay.

Inta ka dib, waxaan guda galayaa Xeerka, waxaan u arkaa soo jeedintii Gudidda Dhaqaalaha inay sax tahay oo ah Xeerka Dekadaha Somaliland.

**Qodobka 2aad** wuxuu sheegayaa in heshiis la gali karto shirkado kale hay'addan aynu assaasaynaa ee Hay'adda Dekada, marka timirtii horeba dab loo waa heshiisyo hore

ayaynu galnay waxaana la inoo sheegay in heshiiskii hore DP World qaadanayo 75% qaadanayso, Somaliland 35% qaadanayso laakiin markii dambe iyadoo Wasiirka Madaxtooyadu inoo sheegay markii hore inaan heshiiska dhinaca aanu badali karin, hadana waxa markii dambe loo badalay in DP World 51% yeelato, Somaliland 30%, iyadoo Itoobiye 19%, marka hada inoo damaanad qaadaya in aanay sidii oo kale dhacayn

**Qodobka 5aad Farqada E** hore ayaa loo keenay brochurelagu sheegay nuxurka heshiis lala galay DP World Wasiirka Madaxtooyada waxaan waydiiyay in dal kale la siino karo saami (share) iyadoo aan Jamhuuriyada Somaliland la waydiisan iyo in dalal kale ku jiraan heshiiska, anigoo marka hayay xog ah in Itoobiya tahay sleeping partner. Waxa kale oo jira lacagta ka soo baxda Dekada oo loo yaqaan dividend ama share of profit oo faa'iidada Jamhuuriyada Somaliland ka hesho Dekada Berbera oo ay DP World maamusho laguma soo daro Miisaaniyada, marka maadaama aynaan wax faa'iido ah ka helin heshiiskii DP World heshiisyo hor leh oo xeerka lagu ansixiyaa waxba ma soo kordhin maayo.

**Qodobka 25aad** ee Miisaaniyada Sanadlaha ah, hay'addu waa inay ku muujisaa Miisaniyadeeda sanadlaha ah faa'iido ka soo gashay DP World (Dividend) ee hore loogu soo dari jirin Miisaaniyadaha JSL.

**Qodobka 31aad** wuxuu ka hor imanayaa Qodobka 54aad ee Dastuurka Qaranka oo awood u siiyay Golaha Wakiilada inuu ansixiyo arrimaha Maaliyadeed ee dalka iyadoo Qodobka 31aad sheegayo inaan cidna laga ansixinayn, marka wuxuu toos uga hor imanayaa Dastuurka Qodobkiisaas 54aad.

**Qodobka 6aad** ee Xubnaha Maamulka Dedakada Somaliland waxa ku qoran in laga dhigo 3 ilaa 9 xubnood oo ah laba tiro oo aad u kala fog Gudidda Dhaqaaluhuna sidii uun bay ku raaceeno waxba kama badalin, marka aniagu waxaan soo jeedinayaa in laga dhigo 7 xubnood. Dekada ugu wayn Dekadaha Somaliland waxay hada leedahay mamaul jira oo ka kooban toddoba xubnood oo intooda badan yihiin carab Imaaraatiya, waxaan iswaydiinayaa sidee baa la isu waafajinayaa labadaas gudi.

**Qodobka 9aad** wa in laga saaro **farqada 3aad**, waayo dalka Somaliland malaha wabi lagu gooshi karo, dalkii aynu hore isugu jirnay ayaa leh laba wabi ee juba iyo shabeel, meel aan xadka Somaliland ku jirin Madaxweynuhu kuma dhawaaqi karo ama amarna kuma bixin, xeerna uma sameyn karno meel aynaan lahayn.

**Qodobka 10aad Farqadiisa 2aad** waxa ku qoran in Madaxweynuhu wax ka badali karo, marka Xeerkan hadii uu dhaqangal noqdo Madaxweynuhu waxba kama badali karo waayo waxay ka horimanaysaa Qodobka 38aad farqadiisa 1aad ee Dastuurka oo sheegaya in awoodda Xeer-dejintu ay gaar u tahy Baarlamaanka, marka farqadaas 2aad waa in laga saaro ayaan soo jeedinayaa.

**Qodobka 23aad Farqadiisa 2aad** dhamaan lacagaha ku xusan farqada 1aad ee Qodobkan waxa lagu shubayaa khasnada Qaranka, halka waan is dultaagay, hada lama odhan waxa

lagu shubayaa Bangiga dhexe, marka xagay taalaa Khasnada Qaranku, marka si shakigu u baxo waxaan soo jeedinayaa in laga dhigo sidan "**dhamaan lacagaha ku xusan farqada 1aad ee Qodobkan waxa lagu shubayaa Khasnad Qaranka ee Banagiga Dhexe ee Somaliland waxaana lagu soo darayaa Miisaaniyada Qaranka JSL.**

**Intaas ayaan ku soo koobayaa, waad-mahadsan tihiin, WSC.**

**Md. Axmed Barkhad Obsiiye (4min, 36sec):-** ASC, inkastoo aanan aad u soo diyaarin, Xeerkan Dekadaha Somaliland hadii aynu nidhi markii hore Berbera uun baa inoo dekad ahayde, waxa loo baahan yahay in Dekado badan la hirgaliyo oo wadanka la balaadhiyo, waayo iminka waxaynu leenahay Dekadaas Berbera oo waxaa soo raaci jirtay Dekada Saylac, Dekada Saylac way aasan tahay gabigeeduba, marka waxa weeye in Dekada Saylac la qodo oo dayr loo sameeyo, xeebta iyo bacaadkii baa afka isku haya oo way sii aasmaysaa, marka waxaan soo jeedinayaa in Dekadaha la balaadhiyo oo ilaa Laasqoray dekado badan la helo oo la hagaajiyo ayaa loo baahan yahay.

Dekada Saylac sidii Ingriiskii uga tagay bay wali tahay, barigii hore C/raxman Tuur baa dalooliyay markii ciidii soo gashay, marka meeshaasi way sii baa'ba'aysaaye waa in Miisaaniyada wax loogu daro oo la hagaajiyo, marka dekadaha waa in la dhiso oo la balaadhiyo.

Tan kale, Lacagta Somaliland laga qaado Dekada oo Shirkad maamusho, lacagtaas maalin walba shirkadaasi waxay ku shubta oo lacagta u xawishaa Abu dabia, war waa in lagacta dalka lagu shubo ilayn bangiyo waynu leenahay oo lacagta dalka ka soo baxda dalka aan laga dirin, barigii UDUB dekadu Miisaaniyada way kabi jirtay laba Milyan oo dollar bay Miisaaniyada ku kabi jirtay, iminka ma jirto oo sidii Xisbiga Kulmiye u yimi waa laga saaray oo Miisaaniyada shaqo kuma laha ilaa xiligii Madaxweyne Siilaanyo, iyadii baaba kabniin loo sameynayaa, waa halkii laga doonayay dhaqaaluhu uu ka soo baxo, hadii iyadii hadii la kabo waa dhibaato.

Sida Xildhibaan C/raxmaan sheegay Saddexda xeer way kala horeeyeen barigii dhowayn ee Xeerka Aagga Ganacsiga ka caagan waxaynu nidhi ha lagu horeysiiyo Xeerka Dekadaha kolka Shir-gudoonka diido wuu ina marsiiyay, marka in siday u kala horeeyeen in loo soo kala horeysiiyo weeye, maaha in ilmihii hooyada laga soo horeysiiyo, ma ilmahaa baahan mise umushaa ilmaha u baahan, marka waxaan soo jeedinayaa in taasna laga waan toobo oo xeerarku siday u kala horeysiiyaan loo kala horeysiiyo.

Waxaan ku soo koobayaa, lacagaheena waa in dalka lagu shubo, waana in la ogaado maalin walba waxa ka soo baxa, Miisaaniyada waa in lagu soo daro wali kumaynaan arag Miisaaniyada wax dekada ka soo gala waana laf-dhabarta dhaqaalaha, marka waa in Miisaaniyada ay ka muuqato, waan ka baxay.

**Md. C/qaadir X. Ismaaciil Jirde (11min, 05sec):-** Shir-gudoonka iyo Xildhibaanaduba way salaaman yihiin, anigu intii doodda Xildhibaanada baan wax badan ka korodhsaday, hawlaha ay dekadu u xilsaaran tahay waxa ka mid ah dhisida, gacan ku

haynta iyo dayac tirka infrastructure-ka Dekada oo ay ka mid yihiin raasiga halka la yidhaahdo ee break water-ka, sea worse-ka, Navigation channels-ka maraakiibtu soo marayso iyo halka maraakiibtu ku xidhanayso, waxaas oo dhan, kumana cada xeerka qaabka waxaas oo dhan u fulayaan.

Waxaan soo eegay port authorities dalalka leeyihiin, marka waxaas oo dhan schedule baa la raaciyaa, maraakiibtu iskama soo gashee dee channels bay ku soo gashaa la qoday, channel-ka survey baa laga qaadaa, halkan waxa ku taala survey la iskama qaadi karo, waxaad moodaa awoodii inay cid kale siinayaan oo leeyihiin dad kale ayaa iska soo gali kara, marka control channel survey cidda qaadaysa, dirijinka cida u xilsaaran, waxa halkan ku xusan kalmad ah coasty erosion oo marka waxaas oo dhaca wax isbadala maayadii dekada inta kudhaw ayay cunta xeebta cidda waajibaadkaasi saaran yahay halkan kuma jirto, sidaan idiin soo sheegayna xeerarkaan soo arkay wax walba laguma daro xeerka eh schedule xoojiya ayaa la raaciyaa, schedule-kaasi meesha wuu ka maqan yahay oo masuuliyadii cidii loo daba fadhiisan lahaa ma jirto haday derijinka tahay, booyadii hagayay tahay, xaataa haday light house waa inay ciddi u xilsaaran tahay, malaha iminka DP World baa gacanta ku hayse maaqaan siday u wada shaqeyn doonaan hadhawto eh.

Tan kale, **awood badan buu Xeerkan Madaxweynuhu ku leeyahay, xeer aynu ansixinay oo Golayaashu u codeeyeen oo Madaxweynuhuna saxeexay ayaa wax ku qoran marka loo baahdo waxbuu ka badali karaa**, amendment mooye wax kale wax lagagama badali karo, malaha toban meelood in ka badan bay xeerka kaga jirta Madaxweynuhu waxba ka badali karaa, marka waxa weeye in waxaas oo dhan meesha laga saaro oo Madaxweynuhu hay'adda baynu sameynay oo authority-ga leh, waa in xidhiidhka Madaxweynaha iyo hay'adda nus-dambeed loo kala dhigaa, yaan la culeysinin. Waxa ku taala hadii Madaxweynuhu dareemo inuu wax ka badali karo.

Waxa ku taal hadii authority-ga khasaare ku yimaado Madaxweynaha kabaya oo ka kabaya Miisaaniyada Qaranka, waxa la yidhi hadii khasaare ku yimaado dayn bay qaadan karaan, marka hadii khasaare ku yimaado waxa u furan ay inay dayn qaataan oo hadhaw iska bixiyaan, maaha in Miisaaniyada meel loogu talagalay inuu Madaxweynuhu ku kabo, taana waxaan leeyahay ha laga saaro.

Waxa kale oo jirta in dekado la sameyn karo hadii loo baahdo, waxa ku qoran Xeerka Madaxweynaha ayaa ogolanaaya hadii loo baahdo in dekado kala sameenayo, baahida dekadaha loo qabo dariiq loo maray leedahay dee, visibility study bay doonaysaa, iminka waxa inagu dhacay reerihii baa tartan galay laba boqol oo wado ayaa is-daba socda, goor ay dhamaanayo ilaahay baa ogo, umadiina ku kacday oo dadkiina isku diray, kolka dekadaha lacag baa ku baxde intaad dadka la khasaarin waa in visibility study la sameeyo oo la yidhaahdo maxay qaban karta, dekaduhuna in is dhisaan weeye ee maaha inay is barbar yacaaan, waxyaabo badan oo barigu khusuusiyaad gaar ah u leeyahay dekadihiisu waxaasay qabanayaan, galbeedkuna waxyaabo badan oo uu khusuusiyaad u leeyahay bay dakedihiisuna qabanayaan, iminka lix wado ayaa Hargeysa nawaaxigeeda kaliya is baal socda mid dhamaatayna ma jirto dadkiina wuu ku lafo jabay,

waa in la hago oo dawladu hagto, hadii dawladu hagi lahayd waddooyinkaas oo wixii isku baahiya la isku dari lahaa waxas oo khasaare ahi ma dhaceen, tana dekadaha waxa soo socota sidaas, baahida Dekadna Madaxweynuhu ma gooyee waxa gooya baahi.

Marka anigu labada qodob ee ugu waawayn ee aan ka hadlaya waxa weeye, Infrastructure-ka cida qabanaysa iyo sida loo qabanayo sida caalamku u isticmaalay aynu Xeerka schedule ahaan u raacino, waxa ka mid ah nimanka liisamada oo waa inay jirta authority liisamada bixin karta oo dhan karta waa viable oo wayna jirta, dadkii waaweynaa ee soo xidhi jiray way gaboobayaan oo dhamaanayaan, ma inankiisa ayaa dhaxlaya sida xamaaliyiinta mise cid baa loo tababarayaa oo xata dibada loo diri karaa, waxaas oo dhan waa inay ku cadaadaan.

Waxaan ragii iga horeeyay ku raacsanahay, arrinta xisaabaha siday u soo dhigeen, waxaan leeyahay structure-kii hore ee jiray yaan laga leexanin, aniga waa la iiga aqoon roonyahay waxa loo sameyn doonaa nin xisaabiye ah oo delegated ah xisaabiye idman oo hoos yimada xisaabiyeena oo ay wada shaqeeyaan, audit-kuna sidiisa ku galo, in authority-gu iskeed isku xisaabiyo oo isku baadho waxaan u arkaa gaf oo ah hay’ad cid walba ka madax banaan iyo wax inagu cusub, marka structureka ha la dhamaystiro schedule-kaasna ha lagu daro hadii kale wax dib inoogu soo noqda buu noqon doonaa hadhaw hadaynaan ku darin, awoodda madaxweynaha la siiyay ee ah function-kii buu wax ka badali kara from time to time ha laga yar fiirsado malaha toban meelood buu kaga jiraa, dee hay’ad aynu u ansixinay xeer oo iyadu miisaaniyadeed iyo xisaab xidhkeedii sameysatay hadii marka la yidhaahdo waad khasaartay yaanu madaxweynuhu kabin, waxa u banaan inay dayn qaataan, waxa u banaan hanti ay leeyihiin inay xaraashaan oo ay ku kabaan, laakiin lacag aanay lahayn oo meel u oolin, ha la siiyo anigu waxaan qabaa inay khalad tahay, xeerkaa aynu ansixinayna yaanu Madaxweynuhu marku u arko wax ka badalin ee waa in wax ka badal uu ku keeno. WSC.

**Md. Axmed Ducaale Bulaale** **(8min, 13sec):-** Bismilaahi, horta wax badan oo Gudiddu soo jeediyay aad baan ugu raacsanahay, Qodobada u baahan in la saxo oo rag badan sexeen ka daba tagi maayo, horta anigu waxaan isleeyahay Cutub iska dhan baa ka maqan Xeerka, marka hore Board-ka guud ee Dekaduhu sida la sheegay waxa hawlaha ugu waaweyn ee qabanayo waxa ka mid ah inuu sameeyo xidhiidh wanaagsan oo ka dhaxxeeya ama ka shaqeysiiyo parters-ka dekadaha ku xidhan iyo inuu ilaaliyo shaqeynta iyo amaanka dekadaha.

Qodobna hada laga dhawaajiyay oo ah waxa manage-gareynaya khasaaraha yimaada Madaxweynaha, waxay ila tahay shaqooyinka Gudidda waxa ka mid ah inay sameeyaan compassions-ka oo mararka qaar sharci u tahay inay dayn u qaataan khasaaraha yimaada si ay buuxiyaan.

Board-ka say sameynaynaa ma inay hal dekad oo Berbera ah maamulaan baa? Jawaabtu waa maya. Marka halkan kuma cadda strategy-yada iyo qaabka ay Dekadaha u horumarinayaan oo cutubka kuma jirto, way maamulyaan uun mooyee, marka waxaan isleeyahay cutubkaas wuu ka maqan yahay.

Gudiddu qodob yar oo ay lifaaq kaga dhigeen bay dekadaha ku soo qoraan, waxay taxeen liiska dekadaha taas oo Dekada Saylac ugu horeysiiyeen oo la leeyahay waa dekada aasan, dekado badan oo kaluumaysi u badan baa jira, su'aasha aan iswaydinaynaa waxa weeye noocyada dekadaha aynu ka shaqeysiinaynaa waa kuwo sidee u eeg? Waynu ognahay oo aduunka wax jira deko ganacsi oo intaas oo nooc u kala baxaya, waxa jira xataa group dekado ah oo dekad qudha ka wada hoos shaqeeya, waxa jira dekado adeegyo gooni ah qabta sida dekadaha harbers-ka la yidhaahdo, marka noocyadaas dekadaha waa in lagu qeexaa dhismaha hay'adda hawlaha ugu waaweyn ee ay qabanayaan, dekado noocee ah bay sameynaysaa, sidayse uga shaqeysiinaysaa.

Dalalkan aynu dariska nahay sida Keynya waxa ku taala Mambasa Dekada la yidhaahdo oo ah dekada ugu wayn ganacsiga bariga Afrika ku taalla, waxa jira dekado badan oo iyada la shaqeeya oo adeegyo gaar ah u qabta, waxa ka mid ah Laamu Dekada la yidhaahdo oo hada loo dhigayo mashruuc la yidhaahdo 2030ka inay noqoto transport oo corridorkoodu ku xidhan yahay South Africa iyo Itoobiya, waxa kale oo ka mid ah Dekada la yidhaahdo Bay oo iyana hada loo diyaarinayo pipe line shidaal ka soo qaada south Sudan, waxa kale oo jira dekado yar yar oo kale oo Mambasa la shaqeeya oo service qabta qaarna harber yihiin qaar dekado ka sii yaryar oo lagu nadiifiyo maraakiibta iyo qalabka dekadaha, marka Cutubkaas oo dhami wuu ka maqan yahay oo ay tahay in lagu soo daro.

Wax kale oo ka maqan oo ay tahay inaynu ku soo darno imisa nooc Dekadood bay noqonayanaa, waa in noocyada dekadahana la sheego, maxaa dekado kalluumaysi noqonaya, dekadaha qaarkood suuqyada ugu waawayn board gaar ah bay u sameystaan si ay u ilaaliyaan, marka aniga waxay ila tahay cutubkaas noocyada dekadaha, siday u shaqeynayaan iyo waxay qabanayaan meesha wuu ka maqan yahaye ha lagu soo daro.

Waxa kale oo jira Board-ka iyo Shirkada DP World oo Dekada Bebera hada maamusha ma Shirkada ka saraynaysa Board-ka mise Boardku iyaga Shirkadaha DP World ka sareynaya oo maamulaya, hadii dekado kale shirkado kale lagu wareejinayo waxa weeye Board-ka guud inuu isagu waa inuu waxba maamulaa, waxa jira dekadaha Mambasa hoos taga dekado gaar loo leeyahay hadana iyagu maamulaan board-koodu guud oo dusha ka maamulaya, marka taasna waa inaynu ku qeexno boardku wuxuu yeelanayo. Liiska Dekadaha waa inay categorice-gareynaa iyo waxay kala qabanayaan. Marka waxaan aad ugu cel-celinayaa cutubkaas aan sheegay ee ka maqan in Xeerka lagu soo daro.

Waxa kale oo lifaaqa Xeerka ku jira **Mudadda Gudiddu waxay noqonaysaa mudadda uu Madaxweynuhu ku soo saaro degreeto,** anigu waxaan leeyahay taas yaanay noqone waa inaynu wakhti u cayinaa 5 sanadood ama 7 sanadood oo aynu Xeerka ku qeexnaa mudo cayiman sida shan sanadood ama todobada sanadood.

Waxa kale oo ay tahay in lagu daro oo ka maqan awoodaha maamul ee gudidda inay dayn qaadan karaan markay doonayaan inay horumar sameeyaan ama markay

doonayaan in khasaare ku dhacay ku xaliyaan, marka anigu intaas ayaan ku soo koobayaa, WSC.

**Md. Xasan Xuseen Shide** **(3min, 11sec):-** Shir-gudoonka, Mudanayaasha, Saxaafada iyo Bulshadaba ASC, Markaan mawduuda usoo gundo dago xeerarkan lakala horaysiiyay wiig uunbaa u dhaxeeya mushkilad maaha haday umushu horayso iyo haduu ilmuhu horeeyaba wiig gudihii baynu ku gudbinaynaa wadan yab yab ahna waynu ka shaqaynaynaa, markaa islaax baynu wadnaayo sanadkan uunbaaba laynoo tiriyaa khalfadhigan baan idin leeyyahay aniguyoo xeerar badana ay inag abaxeen qaar badan oo muhuumana aynu gudbinaynaa.

Anigu si khaasa waxaan u bartay international marine time kabtan baan ahay maraakiibta wada markaa aqoon badan baan u leeyahay dekadeheenuna waxay ku jiraan dekadaha caalamiga ah, dekad walibana waxay leedahay sidii noobiyadoo kale calaamad lagu garto oo sign ah, marka badaa marayso waad garayanysaa laydhkaa kuu baxayaa inuu berbera yahay inuu jabuuti yahay waa macruuf xeerkan ina hor yaalaana wuxuu dabaqayaa international Mari time law. Hadaba inagu waxaynu xeer dajin u nahay wadan yab yab ahoo meel hoose laga soo bilaabay oo baaba'ay is barbar dhiga aad samaynaysee ama Kenya aad gaynaysao ama uk aad geynaysaa lama sinin markaa wixii xeer ina hor yaalaa ha gudbo markaynu isku adkayno way inagu adkaanaysaaye taasi waa qodob.

Soo jeedinta Guddidu ay sameeyeen aadbaan ugu raacsanahay mid qudhuunbaan ka saarayaa in la idhaahdo xeerka dekadaha Somaliland min lawyacado ilaa ceelaayo oo magacyadan laga reebo hadii kale ana ceel sheikh baan kusoo dari aftirsiimo reero ayay u dhacayaan. Qodobada kale ee xildhibaanadii iga horeeyen sheegeena waan raacsanahay

**Md. Xasan Xuseen Codyare** **(11min, 41sec):-** Shir-gudoon, Mudanayaasha, Saxaafada iyo Xoghaynta intaba waan salaamayaa**,** Mudane Gudoomiye, waxaan aad u amaanayaa Mudanayaashii shalay iyo kuwii maantaba ka dooday oo aad moodo inanay waxbaba ka tagin, waxaan kaloon amaanayaa Guddi hoosaadka Dhaqaalaha ee ka soo shaqeeyey xeerkani, habase ahaatee xeerkani waa xeer balaadhan waa xeerkii haya'dda Dekaddaha Somaliland, xeerkana waxaa loo baahan yahay in aad iyo aad looga bogto gal daloolooyin badana wuu leeyahay, soo jeedimaha guddidana wax badan waan ku raacsanahay.

**Qodobka 6aad** ee Guddida labada meelood ka shaqaynaya ee dekada iyo kii hore ee aan ansixinay oo 9 lagu sheegay ama 3 baa qoran sidii xildhibaanadu sheegeen waa laba xaraf oo kala duwan markaa waxaan kusoo ururin lahaa oon ku raacsanahay xildhibaanadu way magac dhabeen 7 da ruuxba oo ay ku biirayaan waliba meereeyaha loo magacaabayo aaga cashuuraha ka caagan oo isna guddida ku biiri doona 7 inay noqdaan waaan soo jeedin lahaa.

Ta labaad waxaa jira sidii xuseen caydiid ba shalay sheegay qodobadana u dul maray qaladaad baa ku jira meelaha qaarkood xafa qoraalka iyo odhaahyada waxbaa yara khaldan, markaa in guddidu dib u habayn. Xeerkan waa xeerkii dekadaha Somaliland meelaha qaarkoodna waxaa qoran dekada markaa in la saxo oo la waafajiyo.

Sidii hore oo sheegay cashuuraha iyo khidmadaha **Qodobka 31aad** weeye farqadiisa 1aad waxaa lagu koobay dhaqan galinta cashuuraha khidmadaha ajuurooyinka hayada dhaqan galinayso marka madaxweynuhu saxeexo, xildhibaanadii hore uga hadlay waan ku raacsanahay madaxweynuhu aadbuu ugu badan yahay waxaana laga tagay marka golaha wakiiladu ansixiyo wayba ka maqan tahay, marka madaxwenuhu saxeexo marka madaxweynuhu ogolaado aadbay ugu badan tahay sidii hore loo sheegayna xeerka 53aad baa golaha wakiilada siinaya in ajuuro ama cashuur aanu ansixin aanay sharci ahayn sidaa darteedna qodobkaa sidaa haloo saxo.

**Qodobka 31aad Farqadiisa 5aad** waxaa qoran hayadu hadii ay u aragto lagama maarmaan waxay dhaafi kartaa gabi ahaanba tacriifadaha iyo khidmadaha iyo lacagaha ay qaado, eraygaasi waa khaldan yahay sixitaan buu u baaan yahay. Qodobo badan ayaa qeexaya hadii uu ogolaado madaxweynuhu arintaasina culayskeeda ayay leedahay oo waxayba ahayd halka madaxweynaha lagu celcelinayo in dekaduhu ay hoos tagaan wasiir oo madaxweynaha way ku badan tahay in wasiir laga horaysiiyo oo lahoos geeyo wasiir oo la idhaa wasiirka ganacsiga ama wasiirka dekadaha la idhaa ayaa ka haboonaan lahayd.

**Qodobka 23aad** ujeedadii xeerkan gabigiisaba wuu badalayaa sababtoo ah dhamaan lacagaha ku xusan farqada 1aad waxaa lagu shubayaa buu idhi khasnada qaranka inaguna waxaan abuuraynaa hay'ad madax banaan oo qaabilsan dekadaha, lacagihii tacriifada ahaa ee qodobkaasi sheegayayna waxaa la leeyahay waxaa lagu shubayaa khasnada qaranka, qarankuna wuxuu leeyahay account number 8 oo xisaabiyaha guud baa maamula dekaduna inooguma cayina oo xisaabiye idman inooguma qorna dekaduna miisaniyada inooguma xusnayn khudbadii wasiirkana kumay jirin lacago dekaduhu bixiyaan waxay ahadyuun lacagtaas kastamada kasoo galaan iyo lacagahaa cashuuraha bariga ayay ahayd miisaaniyadeenuba waxay koobaysay xataa tii baayac mushtarigaa maqnayd tii dekadahaa maqnayd doodaydii horay ku jirtay dekaduna waaa ilaha dhaqaale ee ugu weyn bay ahayd dekaduna sharaakaa lagu yahay oo wadamaynu shuraako ku nahay, waxaan kasoo shaqeeyey farsamo yaqaanadii dekadaa kasoo shaqeeyey waxaa kasoo shaqeeyey wasaradii maaliyadaa kasoo shaqeeyey af ingiriisiga iyo soomaliga labada waxaa ku qoran lacagahaasi inay ku dhacaan khasnada qaranka, khasnad qaran la ma yidhaaye khasnada dawladaa la idhaa laakiin anigu arintaasi waxaan u qaadanayaa maadaama haya'dduna madax banaan tahay miisaaniyada xisaab xidhkeedii ka maqan tahay oo aan xisaab xidhkana la inoogu soo darin.

Qodobkaasi wuxuu khaldayaa dhismaha haya'dda markaa arintaa ama dib haloogu noqdo ama ha la inoo keeno dhaqdhaqaaqa xisaabahaa la sheegayo u malayn maayo guddidu hadii uu cadaynayo waakii berbera tagay haday xisaabahaa soo ogaadeen iyagaa inoo sheegin laakiin u malayn maayo inay xisaabahaa halkaa u kaceen markaa arintaasi khaladbaa ku jira waxaa la hoos keenayna waa wasaaradii Maaliyada sida imika

dhigan xisaabiye idman baa meelahaa loo sameeyaa maaliyada martaaa xisaabiyaha guud bay martaa kuwaana ma martee way madax banaan tahay oo shirkado ajanabiyaaba xukuma board ka duwan baana xukuma, markaa khalad weynbaa ku jira halkaa sixitaan buuna golaha uga baahan yahay in la saxo hadii loo baahdana cidii ku shaqada lahayd in loo yeedho ayaa lagama maarmaan ah oo ay inaga shaki saaraan (secelment buu helay).

**Qodobka 36aad** soo jeedinta guddida dhaqaalaha waxaa igala haboon qoraalka hore waayo arintaasi guddi dekada ayuu sheegayaa qodobkaasi waa arin xirfadeed markaa ainta qolada hore soo dhigeen baan qaadan lahaa.

Lifaaqa labaad mudo xileedka ee guddida sare in la cayimo ayaan soo jeedinayaa waanan soo qaatoo 4 sano ayaan ka dhigay oon soo jeedinayaa in laga dhigo.

Markaa yaynaan degdegin xeerkani waa xeer muhiima oo wax tarra waxaan soo jeedinayaa in la saxo oo wixii ku jira ee khalada laga saaro oo dib u eegis halagu sameeyo yaan lagu deg-degin, WSC.